

Qorshe lagu yaraynayo goysmada/maqnaanshaha iskoolka(Rinkebyskolan)

Ujeedo: inaysan aradayda dhigata Rinkebyskolan u goynin xisadaha iskoolka iyo in shaqaalaha iskoolku si joogto ah uga hortagaan goysmadaas iyada ah.

Xeerka Rinkebyskolan(ee waxbarashada): lama oggola in la gooyo ama la sagsaago waxbarashada, macallimiinta ayaana diiwaan-gelineysa arday walba oo maqan sabab la'aan.

Sharciga(qaanuunka) Waxbarashada Iswiidhan wuxuu dhigayaa inay waajib ama khasab tahay dhigashada iskuulku: 1aad-9:aad; taasoo ah in ardaydu soo xaadiraan ama yimaadaan iskuulka kuna socdaan jadwalka waxbarashada iskuulka, waana xil saaran waalidka in ardaygu joogo waxbarashada maalinlaha ah ee iskuulka si waafaqsan xeerka iyo jadwalka iskuulku dhigtay.

Maqnaanshaha la oggol yahay waa marka waalidku ogeysiyo iskuulka iyo macallimiinta, sida: jirro(xanuun), ballan takhtar, ama oggolaansho fasax aad ka hesho maamulka iskuulka.

Goysmadu(maqnaanshahu) waa radayga oo ka maqnaada waxbarashada fasalka soodaahid ama maqnaasho aan Iskuulka la ogeysiin owgeed(sababteed).

Goysmada ama maqnaanshaha sabab-la'aaneed waxaa loogaga hortegi karaa sida hoos ku xusan:

1. Macallinka ayaa la xiriiiraya waalidka oo telefoon u diraya.
2. Hadday maqnaanshaha wax iska baddali waayaan labada toddobaad ee hore waalidka iyo ardayga ayaa la kulmaya macallinka si looga wada hadlo dhibka jira. Toddobaadka xigana waxaa loo kuurgelayaa xaadiritaanka ama imaashaha ardayga oo aad loola soconayaa, waxaana la samaynayaa kulamo isdaba-joog ah.
3. Hadday goysmada ama maqnaanshaha sabab-la'aanta ahi xallismi weydo ama joogsan weydo waalidka iyo ardayga ayaa kulan loogu yeerayaa iyadoo si qoraal ah lagu wargelinayo.
4. Waxaa laga hadlayaa arrinta loona gudbinayaa guddiga(masuuliyiinta) ardada, kuwaasoo kadib u sii gudbinaya maamulka degmada ee arrimaha bulshada(Maamulka Cayrta).